# Tilmaamaha Muuqaal ah ee Maxkamadda Degmada Anoka




Waxaa abuuray Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Degmada Anoka iyo Barnaamijka Coon Rapids iyo Fridley Victim Witness

Boggan si ula kac ah ayaa loo baneeyay.

Ma waxaad imanaysaa Dhismaha Maxkamadda Degmada Anoka?

**Tilmaan-bixiyahan ayaa kaa caawin doona inaad fahamto waxa aad fili doonto.**


| MAWDUUC | BOGGA |
|---|---|
| Ammniga Maxkamadda | 4-5 |
| Helitaanka qolka maxkamadda | 6-7 |
| Yaa ku jiri doona qolka maxkamadda? | 8-10 |
| Maxaa dhacaya markay gaadho inaad markaaga markhaati furto? | 11 |
| Doorkaaga iyo sababta ay muhiim u tahay inaad joogto halkan | 12 |
| Yaa go'aansada haddii eedaysanaha uu yahay dembiile ama uusan ahayn? | 12 |
| U diyaargarowga maxkamad qaadid | 13 |
| Tallooyin waxtar leh | 13 |
| Tilmaamaha iyo macluumaadka xiriirk | 14 |

# Ammniga Maxkamadda

- Kahor inta aanad galin dhismaha maxkamadda, waa inaad ka gudubtaa qeybta ammaanka.
- Dhamaan walxaha aad sidatid waxa la dhex marin doonaa mashiinka raajada. Waxaad dhex mari doontaa qalabka hela biraha.
- Tan waxaa loo sameeyaa si looga hortago in martidu ay dhismaha maxkamadda keenaan waxyaabaha mamnuuca ah. Tallaabooyinka ammaanku waxay ilaaliyaan nabadgelyada dhamaan dadka soo booqda waxayna ka hortagaan in waxyaabaha la mamnuucay ay galaan qolka maxkamadda.



# Ammniga Maxkamadda




**Maxay yihiin waxyaabaha aan la ogoleyn in lala galo gudaha maxkamadda?**

- Qori ama rasaas
- Midiyaha ama qalabka wax lagu jaro
- Noocyada kiimikada wax lagu buufiyo
- Waxyaabaha qarxa
- Dareeraha guban kara
- Qalabka macmalka ah ama kuwa lagu ciyaaro ee walxahaas

**Yaan ka arki doonaa goobtan?**

- Ammaanka maxkamadda waxaa maamula Xafiiska Sarkaalka Booliska ee Degmada Anoka. Saraakiisha labiska xidhan ayaa ah boolis, oo sidoo kale loo yaqaano sharci-ilaaliyayaal.
- Haddii aad qabtid wax su'aalo ama walaac ah, saraakiishan ayaa ku caawin kara.

# Helitaanka qolkaaga maxkamadda

- Marka aad ka gudubto ammaanka, waxaad darbiga ku arki doontaa shaashado kumbuyuutar. Kuwani waxay ku tusinayaan magacyada eedeysanayaasha ama kiisaska maxkamadda ka socda maalintaas, iyo sidoo kale qolalka dhageysiga lagu qabanayo.
- Qolalka maxkamadu waxay leeyihiin lambaro. Mid kastaa wuxuu leeyahay xaraf iyo lambar si ay kuugu sheegto garabka (Bari, Galbeed, Dhexda) iyo dabaqa. Tusaale ahaan, qolka maxkamadda ee C300 wuxuu ku yaalaa garabka dhexe ee dabaqa saddexaad.
- Khariidadaha waxaa laga heli karaa dhamaan maxkamada. Haddii aad weli u baahatid in lagaa caawiyo sidii aad u heli lahayd qolka maxkamadda, waxaad weydiin kartaa sharci-ilaaliyayaasha ama waxaad ka heli kartaa daaqada macluumaadka ee maxkamadda (oo ku yaalla wadada ka baxsan shaashadaha kombiyuutarka).



# Helitaanka qolkaaga maxkamadda






# Yaa ku jiri doona qolka maxkamadda?

| DOORKA | SHAQADA |
|---|---|
| **Garsoore** | Garsoorahu ayaa maamula maxkamadda. Garsoorahu wuxuu fadhiyaa miis ballaaran oo yaala xaga hore ee qolka waxaanuu xirtaa hu' madow. Garsoorka wuxuu dhagaystaa qareennada iyo kuwa kale ee ka hadlaya maxkamadda, si uu go'aan uga gaadho dacwada. |
| **Karraaniga maxkamadda** | Wuxuu fadhiistaa kumbuyuutar ag yaala garsooraha wuxuuna ka caawiyaa nidaaminta caddaynta iyo dukumiintiyada. |
| **Wariyaha Maxkamadda** | Wuxuu fadhiistaa kumbuyuutar ag yaala garsooraha wuxuuna qoraa waxkasta oo la yiraahdo marka maxkamad la joogo. Wariyeyaashu ama garsoorka ayaa laga yaabaa inay dadka ka codsadaan in ay higaadiyaan ama ku celiyaan erayada si loo saxo. |
| **Eedaysane** | Qofka dambiga lagu soo oogay. |
| **Qareenka Difaaca** | Wuxuu matalaa eedaysanaha maxkamadda horteeda. |
| **Xeer ilaaliyaha** | Wuxuu matalaa Gobolka Minnesota muddada maxkamad qaadida. Hay'adda xeer ilaaliyaha ayaa ah tan soo gudbisay dembiyada ka dhanka ah eedaysanaha. |
| **Takhasusaha Markhaatiga Dhibanaha** | Wuxuu u shaqeeyaa sidii xiriiriye u dhexeeya markhaatiyaasha iyo xeer ilaaliyeyaasha. Wuxuu ka caawiya codsiyada maxkamadda, wuxuu markhaatiyada ugu yeedhaa maxkamadda, waxaanuu caawiyaa dhibanayaasha. |
| **Sharc-ilaaliye** | Waa sarkaal lebisan oo mas'uul ka ah ammniga maxkamadda. |
| **Xeer-beeg** | Waxay dhageystaan markhaatiga iyo caddaynta waxayna keenaa xukun dhamaadka maxkamad qaadida. |
| **Adiga** | Si daacad ah uga sheekee waxa aad xasuusto si qof kasta oo qolka maxkamadda ku jiraa u maqli karo waxaad aragtay ee ku saabsan siday wax u dhaceen. |

# Yaa ku jiri doona qolka maxkamadda?

- Waxa jiri kara dad kale oo jooga qolka maxkamadda, oo ay ka mid yihiin: turjumaanada, shaqaalaha bulshada, xubnaha dadweynaha, warbaahinta, iyo qoyska iyo asxaabta eedaysanaha.
- Dhageysiyada maxkamadda ee dadka waaweyn ayaa u furan dadweynaha, sidaa darteed qofkasta ayaa fadhiisan kaaa oo fiirsan kara.
- Dhageysiga dhalinyarada waxaa sida caadiga ah way ka xiran yihiin dadweynaha.



# Xagee ayuu qof kasta fadhiistaa?



## Maxaa dhacaya markay gaadho inaad markaaga markhaati furto?

- Markay gaadho inaad markaaga markhaati furto, waxaa lagugu yeeri doonaa qolka maxkamada.  Markaad tagto goobta markhaatigu, karraaniga maxkamadda ayaa kaa codsan doona inaad kor u qaado gacantaada midig oo aad ballanqaado inaad sheegi doonto runta.



- Kadibna waxaa lagu weydiin doonaa inaad fariisato goobta markhaatiga. Waxaa lagaa codsan doonaa inaad sheegto magacaaga koowaad iyo kan dambe waxaana laga yaabaa in lagu weydiiyo inaad higaadiso.
- Qareenadu waxay ku waydiin doonaan su'aalo ku saabsan naftaada iyo sababta aad u joogto maxkamad.
- Marka aad marqaati furaysid, waxaa muhiim ah in la xasuusto in hal qof kaliya uu hadli karo waqtigiiba.  Tani waxa loogu talogaly sida garsooraha iyo xeer beegtida ay kuu maqli karaan, iyo wariyaha maxkamadu uu u qori karo waxa qof waliba uu yidhi.
- Eedaysanuhu wuxuu joogi doonaa qolka dhegaysiga marka aad marqaati furayso.

## Doorkaaga iyo sababta ay muhiim u tahay inaad joogto halkan

- Marqaati furistaadu waxay lagama maarmaan u tahay nidaamkeena cadaaladda. Shaqadaada marqaati fure ahaan waa inaad u sheegto xaqiiqda sida runta ah iyo si saxda ah ee aad u xasuusato.
- Ha isku dayin inaad kusoo tobabarato ama soo qeybto waxa aad sheegi doonto. Taas bedelkeeda, isku day inaad sawirato wixii dhacay si aad u awoodo inaad uga jawaabto su'aalaha si kalsooni leh.
- Dhamaan marqaatiyada loo yeedhay waxay hayaan macluumaad ku saabsan dembiga.  Xitaa macluumaadka yar yar ayaa noqon kara mid muhiim ah oo lagu ogaanayo wixii dhab ahaan dhacay.



## Yaa go'aansada haddii eedaysanahu uu yahay dembiile ama uusan ahayn?

- Eedaysanuhu waxa la go'aansadaa haddii garsooraha ama xeer beegtida ay dhagaystaan dacwada maxkamadda.
- Haddii ay jirto xeer beegti, xeer beegtida ayaa wada fadhi doona qeybta xeer beegtida.
- Xeer beegtu waxay dhegeystaan maxkamadeynta, goorta ay dhammaato, waxay go'aan ka gaari doontaa haddii eedaysanaha uu yahay dembiile ama aanuu ahayn.
- Haddii aanay jirin xeer beegti, garsooraha ayaa go'aansada kiiska.

## U diyaargarowga maxkamad qaadid

- Si aad isugu diyaariso maxkamad qaadidaada waxa laga yaabaa inaad awoodo inaad dib u eegto qoraalkaaga si ay u cusboonaysiiso xusuustaada. Mararka qaar way adag tahay in la xusuusto wixii dhacay. Isku day in aad xasuusato intaad awooddo. Haddii aadan garanaynin jawaabta su'aasl ama aadan fahmin su'aasha, waa inaad sidaas tiraahdaa.
- Way adkaan kartaa in laga hadlo wax dhibaato ama qarsoodi ah. Xasuuso inaad qaadato waqtigaada marka aad ka jawaabeyso su'aalaha. Waa caadi inaad cabto biyaha ama codsato nasasho.
- Haddii aad qabtid baahi khaas ah, su'aalo ama walaac, u sheeg takhasusaha marqaatiga dhibbanaha. Waxa kale oo aad takhasusahaaga ka codsan kartaa inaad qof ku taageera aad usoo kaxeysato maxkamadda.

## Tallooyin waxtar leh


- Xusuusnow inaad soo qaadatao warqadaada maxkamad u yeerida.
- Bakhtii telefoonkaaga gacanta.
- Ha calalin xanjo.
- Si habboon ugusoo labiso goobta maxkamadda. (Takhasusahaaga marqaatiga dhibanaha ayaa bixin kara hagis).
- Waqtiga aad soo hor istaagi doonta wuu kala duwanaan karaa. Imow waqtiga saxda ah oo hubi inaad waqti dheeraad ah heysatid lacala haddii dhageysiga uu ka dheeraado inta la filayo.

# Tilmaamaha iyo macluumaadka xiriirka

Maxkamadda Degmada Anoka waxay ku taal bartamaha magaalada Anoka, gaar ahaan geeska Main Street iyo Third Avenue:

**2100 3RD AVENUE**
**ANOKA, MN 55303**

Goobta gaadhi dhigashada waxaa laga heli karaa fooqa gaadhi dhigashada ee ku xiga maxkamadda iyo Xarunta Dawlada. Irida laga galo fooqa gaadhi dhigashadu wuxuu ku yaalaa Van Buren Street.




Miiska hore ee Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Degmada Anoka: 763-324-5550

Adeegyada Dhibbanaha / Markhaatiga ee Qareenka Degmada: 763-324-5540

Barnaamijka Coon Rapids iyo Fridley Victim Witness : 763-767-6495

Macluumaadka guud ee Maxkamadda Degmada Anoka: 763-760-6700